Macluumaad ku socda mas'uuliyiinta carruurta

# Nolosha iyo caafimaadka baaritaanka dhalinyarada

Inta u dhaxaysa 23 febraayo iyo 13 maarso , gobolka Sörmland, oo la kaashanaya degmooyinka gobolka iyo dugsiyada, waxay samayn doonaan su'aalo laga jawaabayo oo ku saabsan nolosha iyo caafimaadka dhalinyarada. Ardaydu waxay buuxin doonaa foom su'aalo ah inta ay joogaan wakhtiga dugsiga.  Su'aalaha laga jawaabayo waxa lagaga jawaabayaa kombuyuutar, surplatta (Ipadka) ama mobiilka, macluumaadka lagu geleyao waxa loo diraa dugsiga.

Baaritaanku wuxuu khuseeyn doonaa su'aalo ku saabsan dhinacyada sida xaaladaha nololeed, qaab nololeedka iyo caafimaadka. Natiijooyinka waxaa loo isticmaali doonaa si loogu sii wanaajiyo nolol maalmeedka carruurta iyo dhalinyarada. Tusaale ahaan, natiijooyinkii baaritaanadii hore ayaa loo isticmaalay sidii saldhig looga furi lahaa xarumaha qaabilaadaha wadahadalka ee loogu talagalay dhalinyarada aanu caafimaadkoodu fiicnayn.

Ka qayb qaadashadu waa mid ikhtiyaari ah waxaana su'aalaha looga jawaabayaa si qarsoodi ah. Jawaabaha waxaa lagu ilaalinaya xeerka Ilaaliya xogta guud (GDPR) iyo shacbiga fadweynaha u furan iyo sharciga qarsoodia sirta. Marka natiijada la soo bandhigo ardayna si gaar ah lama aqoonsan karo. Haddii ilmahaagu aanu doonayn inuu ka qaybqaato, ama haddii adigoo ah qofkii mas'uulka ahaa aanad doonayn inuu ilmahaagu ka qaybqaato baaritaanka, waxaad u baahan tahay inaad u sheegto macalinka ilmaha.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan su'aalaha laga jawaabayo ee baaritaanka la xiriir halkan hoose.

Waxaa idin salaamaya

Katarina Gustafson
Gobolka Sörmland
Telefoonka: 070-378 77 63
e-post: katarina.gustafson@regionsormland.se

[Horumarka gobolka Sörmland ee gudaha Gobolka Sörmland (utvecklasormland.se)]